**Isbahaysiga Dib U Xoreynta**
**Soomaaliya**
**Guddiga Fulinta**
*Xafiiska Warfaafinta & Wacyigelinta*

**التحالف لإعادة تحرير**
**الصــومــال**
**اللجنة التنفيذية**
*مكتب الإعلام والتوعية*

Alliance for Re-liberation of Somalia
The Executive Committee
*Office of Information*

---

# Mowqifka Isbahaysiga ee ku Aadan Siyaasadda Suubaan Salaaxa ee Kooxda Mbagathi

Xaaladda ammaan iyo siyaasadeed ee dalka Soomaaliya ayaa ah mid weli aad u murugsan, taasoo billaabatay ka dib markii ay ciidamada cadowga Itoobiya duulaan qaawan ku qaadeen dalkeena, khilaafsan shuruucda caalamiga iyo qaraarada Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee 1725 iyo 1744, kuwaasoo si cad u qeexayey in aanay ciidamada waddamada safka hore ka mid noqon karin ciidamada Afrikaanka ah ee nabad ilaalineyd ee ay qorsheyneysay Midowga Afrika.

Joogitaanka ciidamada Itoobiya ayaa waxay abuurtay xaalad colaadeed oo keentay burbur baaxad weyn iyo barakicin ballaaran oo ay ku barakaceen dad ka badan 1.5 malyan. Ciidamada Itoobiya oo ku fashilmay in ay dadka Soomaaliyeed xoog ku muquuniyaan oo ay xoriyadooda, qarannimadooda, jiritaankooda iyo karaamadooda baabi’iyaan kuna khasbaan dowlad aanay dadka Soomaaliyeed soo dooran, kalsooni iyo sharciyadna aan ka heysan, ayaa waxay hadda maleegayaan sidii ummadda Soomaaliyed ay u kala qoqobi lahayd ama ay ugu qeybin lahayd maamul goboleydyo ku saleysan qabiil oo iyada ka ammar qaata.

Haddaba, Isbahaysiga Dib-u-Xoreynta Soomaaliyeed isagoo ka foojigan dibin daabyada cadowga iyo kalkaaliyaashiisa, fahmayna shirqoolka cadowga iyo kuwa uu ku dhuunto, ayaa wuxuu qaadatay istaraatijiyad siyaasadeed oo cusub oo lagaga hortago khiyaanooyinka iyo beenta ay doonayaan in ay shacabka kaga indha saabaan dibin daabyooyinka ay maleegayaan oo ay doonayaan in ay ku mijo xaabiyaan halganka xaqa ah ee shacabka dalka kaga xoreynayo cadowga sida naxariis darrada ah u xasuuqaya shacabkeena.

Isbahaysiga wuxuu rumeysanyahay in nidaamka lagu soo dhisay Imbagathi aanu sharciyad ku dhisneyn, aqoonsi iyo kalsoonina ka

haysan shacabka Soomaaliyeed, maadaama aanay dadka soo dooran. Balse ay tahay mid dusha lagaga keenay oo ay ku bahoobeen dagaal oogayaashii ummadda 17 sano ee la soo dhaafay afduubka ku haystay.

Sida la wada ogsoonyahay, kooxda Imbagathi aqoonsi kama helin caalamka 20 bilood ee ugu horeyey, waayo caalamka wuxuu ku qanacsanaa in aanay ahayn wax la taageeri karo. Balse aqoonsiga degdegga ah ee lagu la soo booday ka dib markii ay Maxaakiimta Islaamiga ahaa shacabka ka xoreeyeen bishii Juun 2006 dagaal oogayaashii u diiday nabadda iyo dowladnimo. Sababaha aqoonsiga loo siiyey waxay ahaayeen in:

1- Kooxda Imbagathi la aqoonsado si lagu burburiyo Maxaakiimta Islaamiga oo ku guuleystay in ay kasbadaan kalsoonida shacabka ka dib markii ay ka xoreeyeen dagaal oogayaashii joojiyeenna dhiigii shacabka ee muddada dheer daadanayey.
2- In aqoonsigaasi loo adeegsado in ay ciidamada cadowga Itoobiya guluf colaadeed ku qaadaan Maxaakiimta Islaamka oo cadowga u arkayey in ay dhisi karaan dowlad Soomaaliyeed oo xoog leh oo awoodda Geeska Afrika dheeli tiri karta.
3- In dadka Soomaaliyeed laga hor istaago fursad ay ku dhistaan dowlad ay iyagu leeyihiin oo rabitaankooda ka tarjumeysa.
4- In aan haymanadda Geeska Afrika aan lagula tartamin Itoobiya oo iyadu isu aragta in ay tahay saaxiibka waddamada reer Galbeedka.

Isbahaysigu wuxuu rumeysanyahay:

i- In dalka Soomaaliya uu ku jiro gacan gumeysi loona baahanyahay in ummadda Soomaaliyeed ay u midowdo sidii dalka looga xoreyn lahaa cadowga ku soo duulay iyo daba dhilifyadooda.
ii- In laga wada shaqeeyo sidii ciidamada shisheeye looga saari lahaa dalka, ka dibna dib u heshiisiin dhab ah loo gaari lahaa.
iii- In ummadda Soomaaliyeed aayaheeda ka tashato iyadoo qaadaneysa jidka nabadda ka dib marka dalka laga xoreeyo cadowga ku soo duulay.
iv- Waxaa Isbahaysiga ka go'an in uu ummadda u horseedo xoreynta iyo soo nooleynta qarankii Soomaaliyeed ee burburay.

Kooxda Imbagathi ayaa beryahan dambe la soo baxday siyaasad cusub oo SUUBAAN SALAAX AH oo loogu golleeyahay in lagu jahawareeriyo ummadda Soomaaliyeed. Kooxdu waxay billowday dacaayado la doonayo in shacabka lagu kasbado xilli uu weli soconayaan gumaadkii, barkicintii iyo dhacii iyo kusigii loo geysanayey shacabka Soomaaliyeed. Haddaba, haddii waxa ay sheegayaan ay dhab ka tahay kooxdu, waxaan hordhigeynaa saddexdan qodob in ay ummadda horteeda ka caddeeyaan:

1. In ay caddeeyaan goorta ay ciidamada cadowga Itoobiya ka baxayaan gebi ahaan dalka Soomaaliya.
2. In ay caddeyaan mowqifkooda ku aadan xasuuqii ka dhacay Soomaaliya, iyagoo weliba cambaareynaya.
3. In ay ogolaadaan in la magacaabo guudi caalami ah oo madax banaan oo soo baara xasuuqii ka dhacay dalka.

Haddii ay kooxdu dhab ka tahay waxyaabaha ay idaacadaha ka sheegaan, waa in marka hore caddeeyaan mowqifkooda ku aadan arrimaha kor ku xusan.

Waxay dadka Soomaaliyeed ku baraarugeen nidaamka Addis Ababa ka dhisan oo soo cusbooneysiiyey qorshihii Menilik iyo Hayle Selaase ee ahaa in ay ummadaha ku dhaqan Geeska Afrika oo ay ku jirto Soomaalida gumeystaan xuquuqdoodana duudsiyaan, sida ay hadda ka horba u boobeen gobollo ka mid ah geyiga Soomaaliyed. Duulaanka Itoobiya ayaa salka ku hayo qorshahaasi faca weyn ee ay Itoobiya weligeedba daba joogtay.

Haddaba, Isbahaysiga wuxuu ummadda uga digayaa in aanay ku dhicin dabinnada cadowga kana foojignaadaan siyaasadahiisa lagu doonayo in ummadda lagu kala qeybiyo ka dibna la qabso. Waxaan dhammaan ummadda Soomaaliyeed ugu baaqeynaa in ay midoobaan oo khilaafaadkooda meel iska dhigaan oo ay si wada jir ah u difaacdaan ciidooda. Itoobiya oo ah dal aan bad lahayn ayaa waxay doonaysaa in ay xeebaha Soomaaliya boobto oo gebi ahaanba qaato. Qorshan oo ay la ogyihiin waddamo badan oo weliba kaalmo dhaqaale iyo mid siyaasadeed ku siiya sidii ay u xaqiijin lahaayeen ayaa u baahan in si wada jir ah looga hortago. Qorshahan waxaan lagu fulinayaa Kooxda Imbagathi oo iyadu noqotay nidaam ay Addis Ababa ku adeegato una abuurtay in ay Soomaaliya ku qabsato. Haddaba, waa in la iska jiraan khiyaanooyinka Itoobiya loona midoobo sidii loo fashilin lahaa qorshaheeda.

Waxaa kale oo ay Itoobiyaanka ka faa'ideysanayaan mashruuca waalan ee Mareykan ee loogu magac daray "La dagaalanka Argagixisada" iyagoo ku qaata malaayiin doolar. Haddii Soomaaliya dowlad noqoto, waxay ku waayi doontaa lacagaha ay ku qaataan mashruucaasi. Waayo, dowladda Soomaaliyed ayaa mas'uul ka noqon doonta xuduudkeeda lagalana xisaabtami doonaa wixii ku saabsan amniga gobolka Geeska Afrika.

Isbahaysiga wuxuu oggolyahay ay beesha caalamka kala shaqeyso sidii Soomaaliya looga saari lahaa ciidamada shisheeye ee ku soo duulay xal waarana loogu heli lahaa colaadda daba dheeraatay. Waxaa kaloo uu soo dhoweynayaa mubaadara kasta oo nabad lagu soo dabaalayo sidii Soomaaliya dowlad midnimo qaran loogu dhisi lahaa.

Hase ahaatee, Isbahaysiga wuxuu uga digayaa beesha caalamka in ay ciidamada Itoobiya ku bedesho ciidamo kale oo dagaalama oo aan lagala tashan shacabka Soomaaliyeed.

Isbahaysigu wuxuu beesha caalamka u digayaa in aysan beeshu ku khasbin shacabka dowlad aanay soo dooran oo aan sharciyad iyo kalsooni toona ka haysan. Shacabka Soomaaliyed waxay rumeysanyihiin in Kooxda Imbagathi ay gashay dambiyo dagaal oo aanay noqon karin dowlad matali karta rabitaankooda. Taasina ay tahay mid khilaafsan caddaaladda, xoriyadda qofka, madax bannanida ummadda iyo nidaamka dimoqraadiga iyo bani'aadannimada in dadka nidaam aanay rabin lagu qasbo.

Beesha caalamka waxaa la xusuusinayaa in ay gudato waajibaadkeeda ku aadan oo ay fuliso arrimaha soo socda:

1- In maxkamad la soo taago dhammaan dadkii galay dambiyada dagaalka ee ka tirsan maamulka Addis Ababa, ciidamada Itoobiya iyo kooxda Imbagathi.
2- In ay cambaareyso falalkii dambiyada dagaal ee ay galeen ciidamada Itoobiya iyo Yugaandha iyo milishiyaadka kooxda Imbagathi.
3- In ay la gaaraan gargaar degdeg ah dadka ay barakiciyeen madaafiicda Itoobiyaaanka, mag dhawna la siinayo si ay u dhistaan guryahooda iyo noqoshooda.
4- In dadka barakacay loo oggolaado in ay guryahooda ku noqdaan.
5- In ay isbahaysiga kala shaqeeyaan sidii loo saari lahaa ciidamada shisheeye ee ku soo duulay Soomaaliya.
6- In ay oggolaadaan in ummadda Soomaaliyeed ay xaq u leedahay in ay dhistaan dowlad ay iyagu rabaan.